## Qoddobka 12aad

## Kaalmaynta dhibbanaha iyo wacyigelinta halista miinada

1. Xafiisku waa inuu qaada tallaabo kasta oo suurto gal ah sidii uu ugu fidin lahaa daryeel caafimaad, dib-u-dejinta iyo bulshada dib ugu celin dhibanayaasha miinada waxyeelaysay.
2. Xafiisku waa in uu markasta ka wacyigaliyaa dadka rayidka ah sidii ay ugu noolaadan degaannada miinadu ku jirto iyo sidii ay uga digtoonaadan khataraha kaga soo fool yeelan karta miinada iyo xoolahooda, si ku wajahan qorshaha iyo siyaasadaha qaran ee miinada.
3. Xafiisku waa inuu baadhaa shilalka waxyeelada geystay ee miinada, sababaha ay ku dhaceen, hadii cidii masuuliyadeeda lahayd waa in uu si xeerkan waafaqsan, dhibanaha ugu raadiya daryeel caafimaad iyo cawil celin ama mag-dhaw ku haboon oo shareecada islaamka waafaqsan.
4. Xafiisku wuxuu hubinaya inay hawl-waddeenada wadaniga ah ee ka hawl gala hay'adaha miinada ee ku waxyeeloobay hawl miino ka helaan hay'adahooda daryeelka caafimaad, mag-dhaw iyo dib u dhaqangalin xaaladahooda ku haboon.

## QAYBTA 4AAD

## LA SOCOD IYO DABAGAL

## Qodobka 13aad

## La docodka wadaniga ah

xidhiidha, soona dalbadaan ruqsada kusheegan xeerkan.

3. Markay dhamaato mudada ku xusan faqrada 1aad ee qodobkan, xafiisku wuxuu isagoo kaashanaya ciidamada booliska, sahaminaya goobkasta oo miino taal ama cidkasta oo miino haysato.
4. Xafiisku marka uu helo macluumaadka ku xusan faqrada 3aad ee qodobkan, wuxuu isagoo raacaya Qodobada baadhista, xayiraada iyo qabashada qalabka danbiga ee ku xusan xeerka habka ciqaabta baadhis, xayiraad iyo qabasho ku sameynaaya miino kasta oo la haysto oo aanu xafiisku siin ruqsad xeerka ku xusan ama aanu haysan ciidanka qalabka sida ee qaranku.

## QAYBTA 5AAD

## WARARKA IYO XOGAHA

### Qodobka 17aad

### Helitaanka Xogaha Iyo Qoraallada

1. Xafiisku wuxuu awood u leeyahay, isaga oo ogaysiin qoraal ah ugu diraya inuu qof (cid) kasta ka dalbada inuu xafiiska soo siiyo macluumad ama dhakomentiyo uu ku cayimo qoraalkiisa, hadii xafiisku rumaysan yahay in qofkaasi xog ama qoraalo ku saabsan hawlaha miinada.

### Qodobka 18aad

### Ku dhaqmi waa ama bixin warar been ah

1. Qofkasta oo ka baaqsada isaga oo aan cudur-daar macquul ah u haysan inuu u hogaansamo amar ogeysiin ah oo uu xafiisku siiyey ama isagoo ogsoon si kas ah xafiiska u siiya war been ah oo

